Casharka 15

1. Waa kuma kan kelidii nolosha bixiya oo siiya dadka oo dhan?
-Ilaah.

2. Halkee bay Qaabiil iyo Haabiil ku dhasheen?
-Meel dibadda ka ah Beer Ceeden.

3. Maxay Qaabiil iyo Haabiil ugu dhasheen meel dibadda ka ah Beer Ceeden?
-Waayo Aabbahood Aadan iyo hooyadood Xaawo ayaa dembaabay oo addeeci waayey Ilaah.

4. Maaddaama Ilaah Aadan iyo Xaawo ka saaray Beer Ceeden, halkee bay dadkii kale oo dhan ku dhasheen?
-Meel ka basan Beer Ceeden.

5. Maaa Ilaah u aqbali waayey Haabiil iyo qurbaankiisii?
-Waayo Haabiil wuxuu addeecay Ilaah.
-Waayo Haabiil wuxuu qurbaan ugu keenay Ilaah neef ka mid ah xoolihiisa.
-Waayo Haabiil wuxuu Ilaah ugu yimid dariiqii Ilaah doonayey.

6. Muxuu Haabiil qudhiisu garanayey?
-kHaabiil wuxuu garanayey inuu dembi ku dhashay.
-Haabiil wuxuu kaloo garanayey in dembiyadiisii lagu ciqaabay dhimasho.

7. Muxuu Haabiil ka garanayey Ilaah?
-Haabiil wuxuu garanayey in Ilaah Qoduus yahay.
-Haabiil wuxuu kaloo garanayey in Ilaah dembiyada ood han ku ciqaabo dhimasho.



-Haabiil wuxuu garanayey in Ilaah oo keliya uu badbaadin karo isaga.
-Haabiil wuxuu Ilaah ugu kalsoonaaday inuu isaga u soo diri doono Badbaadiyaha ka furan lahaa dembiyadiisa.

8. Maxaa Ilaah u diiday Qaabiil iyo qurbaankiisii?
-Waayo Qaabiil wuxuu addeeci waayey Ilaah.
-Waayo Qaabiil qurbaan ahaan Ilaah uguma bixinin baraar.
-Waayo Qaabiil waxay la ahayd inuu Ilaah ugu iman karo dariiqiisa.

9. Muxuu Qaabiil ku fikirayey qudhiisu?
-Qaabiil lama ahayn inuu dembi ku dhashay.
-Qaabiil lama ahayn in dembiyadiisa lagu ciqaabayo dhimasho.

10. Muxuu Qaabiil kaga fikiray Ilaah?
-Qaabiil kuma fikirin in Ilaah Qoduus yahay
-Qaabiil kuma fikirin in Ilaah ku ciqaabo dembiyada ood han dhimasho.
-Qaabiil kuma fikirin in Ilaah oo keliya awood u leeyahay inuu badbaadiyo isaga.
-Qaabiil kuma fikirin inuu u baahan yahay BAdbaadiya isaga ka soo furta dembiyadiisa.

11. Kaddib markii Ilaah diiday qurbaankii Qaabiil, maxaa haddana Ilaah ula hadlay Qaabiil?
-Waayo Ilaah wuu jeclaa Qaabiil.
-Waayo Ilaah wuxuu doonayey in Qaabiil qirto dembiyadiisa.

12. Miyaa Qaabiil maqlay codka Ilaah?
-Maya.

13. Waa kuma kan Qaabiil m maqlay codkiisa?
-Qaabiil wuxuu maqlay codkii Shayddaanka.

14. Muxuu Qaabiil sameeyey?
-Qaabiil wuu carooday, oo wuxuu dilay walaalkiis, Haabiil.

15. Miyaa Ilaah arkay wixii Qaabiil sameeyey?
-Haa.
-Ilaah wax waliba wuu arkaa oo wuu garanayaa wax waliba.

16. Miyaa Ilaah ciqaabay dembigii Qaabiil?
-Haa.
-Ilaah wuxuu ciqaabaa dembi oodhan.
-Ma jiro dembi aanu Ilaah ciqaabin.

-Bal aynu akhrinno wixii Qaabiil sameeyey markii Ilaah eryey:

Bal aynu akhrinno Bilowgii 4:16-19 & 23

16-Qaabiilna Rabbiga hortuusuu ka tegay, oo wuxuu degay dalkii la odhan jiray Nood, oo xagga bari oo Ceeden ku yiil.

17-Qaabiilna naagtiisuu u tegay; wayna uuryasatay, oow xay dhashay Enook. Wuxuuna dhisay magaalo, oo magaaladiina wuxuu ku magacaabay magicii wiilkiisii Enook.

18-Enookna waaa u dhashay Ciiraad; Ciiraadna wuxuu dhalay Mexuuya'eel: Mexuuya'elna wuxuu dhalay Metuusha'el: Metuusha'elna wuxuu dhalay Lameel.

19-Laameekna wuxuu guursaday laba naagood; mid magaceedu wuxuu ahaa Caadah, tan kalena magaceedu wuxuu ahaa Sillah.

23-Lamekna wuxuu naagihiisii ku yidhi: Caadah iyo Sillahay, codkayga maqla; Laameek naagihiisow, hadalkayaa



dhegaysta; Nin baan u dalay dhaawicid uu i dhaawacay aawadeed, Iyo nin dhallinyar dufashadii uu wax igu dhftay aawadeed.

-Qaabiil wuxuu diiday inuu Ilaah maqlo.
-Qaabiil wuxuu maqlay codkii Shayddaanka.

-Qaabiil kuwii ka soo farcamay waxay raaceen tusaalihii Qaabiil.

-Qaabiil faraciisa waxay kaloo diideen inay Ilaah maqlaan.
-Qaabiil faraciisa waxay kaloo maqleen codkii Shayddaanka.

-Qaabiil faraciisii waxay diideen inay raacaan dariiqii Ilaah.
-Qaabiil faraciisii waxay ku socon jireen dariiqyadooda.

-Isla sidii Qaabiil u dilay walaalkiis Haabii, ayaa mid ka mid ah faracii Qaabiil, oo la oran jiray Laameek ayaa nin dhallinyaro ah dilay.

-Waayo Qaabiil wuxuu diiday inuu maqlo codkii Rabbiga, Qaabiil faraciisiina waxay ku socon jireen tusaalihii Qaabiil, oo waxay diideen inay Ilaah maqlaan.

-Way inoo ahmiyad ballaaran tahay innaga ood han inaynu maqlano codka Rabbiga.

-Haddii aynaan maqal Ilaah, carruurteennuna waxay raacayaa masaalkayaga, oo waxay diidayaan inay Ilaah maqlaan.

-Qaabiil iyo faraciisii Ilaah uma noolayn.

-Maxay u noolaayeen Qaabiil iyo faraciisa?
-Waxay u noolaayeen oo keliya faakihaysi, lacag iyo inay

hantiileyaal noqdaan.

-Markaa maahan inaynu lacag oo keliy a u noolaanno iyo inaan maal urursanno.

-Lacagta iyo hntida maahan wax ku badbaadinaya.

-Ilaah oo keliya ayaa ina badbaadin kara.
-Ilaah oo keliya ayaa inaga badbaadin kara awoodda Shayddaanka.

-Waayo Qaabiil wuxuu dilay Haabiil, Ilaahna wuxuu Aadan iyo Xaawo siiyey wiil kale.

-Aadan iyo Xaawo ayaa wiilkoodii ugu yeeray Seet.

Bal aynu akhrinno Bilwogii 4:25

25-Aadanna naagtiisii mar kale ayuu u tegey; waxayna dhashay wiil, magaciisiina waxay u bixisay Seet, iyadoo leh, Ilaah abuur kaluu ii soo dhigay Haabiil meeshiisii; waayo, Qaabiil baa dilay isagii.

-Miyaad xusuusataa kaddib markii Aadan iyo Xaawo ay ku dembaabeen Beer Ceeden, in Ilaah ballanqaaday inuu soo diro Badbaadiyaha, si uu dadka uga soo furto Shayddaanka?

-Ilaah wuxuu qorsheeyey inuu soo diro Badbaadiyaha, iyadoo uu soo marayo faracii Haabiil, waayo haabiil wuxuu rumaystay Ilaah.

-Laakiin Shayddaanka ayaa ku dirqiyey Qaabiil inuu dilo Haabiil.

-Shayddaanka wuxuu ku dirqiyey Qaabiil inuu dilo Haabiil, waayo



ma uusan doonayn in Ilaah soo diro Badbaadiyaha oo uu dadka ka soo furto xooggiisa.

-Waayo Qaabiil wuxuu dilay Haabiil, miyaa haddaba Shayddaanku Ilaah ka istaajiyey inuu sameeyo wixii uu horey u goaansaday?

-Maya.

-Ma jiro ruux Ilaah ka istaajin kara wixii uu horey u go'aansaday inuu sameeyo.

-Waayo Qaabiil wuxuu dilay Haabiil, miyaa Ilaah illoobay ballankii ahaa inuu soo diro Badbaadiyaha?
-Maya.

-Ilaahna marnaba ma illoobo ballammadiisa.

-Maxaa Ilaah Aadan iyo Xaawo u siiyey wiil kale oo loogu magac daray Seet?

-Waayo Qaabiil baa wuxuu dilay Haabiil, ilaahna wuxuu go'aansaday inuu Badbaadiyaha ka soo daahiriyo qoyskii Seet.

-Ilaah mar waliba wuxuu dhammaynayaa shaqada uu bilaabo.

-Ma jiro ruux Ilaah joojin kara.
-Xitaa Shayddaankuna Ilaah ma Istaajin karo.

-Seet wuu weynaado oo wuu guursaday.
-Seet xaaskiisiina waxa umushay wiil.

-Waxay magaciisii ugu yeereen Enoosh.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 4:26

26-Seetna waxaa u dhashay wiil, magiciisana wuxuu u bixiyey Enoos; markaasaa dadkii waxay bilaabeen inay Rabbiga ku baryaan magiciisa.

-Ilaah wuxuu inoogu sheegayaa Kitaabkiisa markii cunuggu u dhashay Seet, in qosyskii Seet billaabeen inay magaca Rabbiga ku baryootamaan oo Ilaah bay rumaysteen.

-Ha ahaadeen, Madow iyo caddaan, sabool iyo taajir, yar iyo weyn, rag iyo dumar.

-Qof waliba ee magaca Rabbiga u yeerta wuxuu Ilaah ugu yimaadaa dariiqii Ilaah dhigay, Ilaahna wuu aqbalayaa.

-Weliba inkastoo Seet iyo qoyskiisa ay Ilaah rumaysteen, kuwo badan oo kale ayaan Ilaah rumaysan.

-Mid waliba ee magaca Rabbiga u yeerta wuxuu Ilaah ugu yimaadaa dariiqii Ilaah dhigay, Ilaahna wuu aqbalayaa.

-Markii uu noolaa sannado badan, ayaa waxaa dhintay, Aadan.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 5:4-5

4-Aadanna markuu Seet dhalay ka ddib wuxuu noolaa siddeed boqol oo sannadood; wiilal iyo gabdhona wuud halay.
5-Wakhtigii Aadan noolaa oo dhammuna wuxuu ahaa sagaal



boqol iyo soddon sannadood; dabadeedna wuu dhintay.

-Muxuu Aadan u dhintay?
-Waayo Aadan wuxuu adeeci waayey Ilaah, oo wuxuu maqlay Shayddaanka.

-Xaawona way dhimatay.
-Maxay Xaawo u dhimatay?

-Waayo Xaawo waxay addeeci weysay Ilaah, oo waxay maqashay Shayddaanka.

-Bilowgii, dunida dhimasho kama jirin.

-Ilaah ma uusan doonayn in Aadan iyo Xaawo dhintaan.
-Ilaah ma uusan doonaynin in qofi dhinto.

-Maxaa dadka ood haniba u dhintaan?
-Waa dembiyadeenna awgii.

-Waa maxay ciqaabta dembiga ee dadka?
-Waa dhimashada.

-Ilaah imminka wuxuu inoogus heegayaa kitaabkiisa qiso ku saabsan faracii Seet, oo loogu yeero Enook.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 5:22-23

22-Enookna wuxuu la socaday Ilaah saddex boqol oo sannadood markuu Metushelax dhalay ka dib, wiilal iyo gabdhona wuud halay.
23-Wakhtigii Enook jiray ood hammuna wuxuu ahaa

saddex boqol iyo shan iyo lixdan sannadood.

-Inkastoo Enook dembi ku dhashay, Enook wuxuu rumaystay Ilaah, oo addeecay.

-Maxaa Enook iska graneyey?

-Enook wuxuu garanayey inuu ahaa faracii Aadan iyo xaawo.

-Enook wuxuu kaloo garanayey inuu ku dhashay meel Beer Ceeden dibadda ka jirta.

-Enook wuxuu garanayey inuu dembi ku dhashay.
-Enook wuxuu garanayey inuu u dhashay inuu dhinto.

-Maxaa Enook Ilaah ka garanayey?

-Enook wuxuu garanayey in Ilaah qoduus yahay.

-Enook wuxuu kaloo garanayey in Ilaah ku ciqaabo dunuubta dhimasho.

-Enook wuxuu kaloo garanayey in Ilaah awoodi inuu badbaadiyo isaga.

-Enook wuxuurumaystay in Ilaah soo diri  doono BAdbaadiyaha si looga soo furto Shayddaanka.

-Waxaa kaloo Enook dadka u sheegay inay Ilaah rumaystaan.

-Balse dadka badankiisu waxay diideen inay Enook hadalkiisa maqlaan.



-Badanaa dadka waxay diideen inay Ilaah rumaystaan.

-Maalin, ayaa wax la yaab leh qabsadeen Enook.

Bal aynu idiin akhrinno Bilowgii 5:24

24-Enookna Ilaah buu la socday; waana la waayay; maxaa yeelay, Ilaah baa qaatay isagii.

-Maxay ahaayeen wixii la yaabla lahaa ee ku dhacay Eenook?
-Ilaah baa Enook u qaatay Jannada oo  uu la joogaa.

-Sidee bay jannadu u eg tahay?

-Jannada waa meel qurux badan halkaasoo aanay jirin murug iyo oohin.
-Jannada waa meel qurux badan oo cudurro iyo dhimashoba kama jiraan.

-Jannadu waa halka Ilaah iyo malaa'igihiisu ay ku nool yihiin.

-Miyaa badankiin aragteen dalka Maraykanka?
-Maya.

-Weliba kuwo badan oo idinka mid ah ayaan tegin America, haddana America waa meel ka mikd ah dunida.

-Inkastoo innagu aynaan tegin jannada, haddana jannadu waa meel jirta oo hubaal ah.

-Halkee bay jannadu ku taallaa?
-Jannadu waxay ku taallaa meel qorraxda, xiddiga, iyo dayaxaba

ka fog.

-Maxaa Ilaah Enok u eeyey Jannada?

-Miyaanu dembaabin Enook?
-Maya.

-Enook wuxuu ka mid ahaa faracii Aadan iyo Xaawo, isla sida ddka kale ood han.

-Enook wuxuu ku dhashay dembi, isla sida dadka kale oo dhan.

-Maxaa Ilaah Enook jannada u geeyey?

-Waayo Enook Ilaah buu addeecay.
-Waayo Enook wuxuu Ilaah ugu yimid dariiqii Ilaah dhigay.

-Waayo Ilaah wuxuu abuuray dadka oodhan, Ilaahna waa kan iska leh dadka oo dhan.

-Waayo Ilaah wuxuu abuuray dadka ood han, Ilaahna wuxuu doono ayuu dadkiisa u samayn karaa.

-Waayo Ilaah wuxuu abuuray Enook, oo Enookna Ilaah buu addeecay, Ilaahna wuxuu Enook geeyey jannada.
-Enook ma dhiman.

-Intuusan dhiman ka hor, ayaa Ilaah Enook samada u qaaday.

-Enook waa kan keliya ee aan dhimasho arag, oo Ilaah wuxuu isagii geeyey Jannada.



-Magaca Enook wiilkiisa wuxuu ahaa Metushellax.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 5:25-27

25-Metushelaxna wuxuu jiray boqol iyo toddoba iyo siddeetan sannadood, wuxuuna dhalay Lamek.
26-Metushelaxna wuxuu noolaa markuu Lamek dhalay ka dib toddoba boqol iyo laba iyo siddeetan sannadood, wiilal iyo gabdhona wuu dhalay.
27-Wakhtigii Metushelax noolaa oodhammuna wuxuu ahaa sagaal boqol iyo sagaal iyo lixdan sannadood; dabadeedna wuu dhintay.

-Enook wiilkiisii Metushellax wuxuu ahaa ninkii ugu cimriga weynaa dadka dunida.

-Metushellax wuxuu noolaa 969 sannadood.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 5:28-29 & 32.

28-Lamekna wuxuu jiray boqol iyo laba iyo siddeetan sannadood; wuxuuna dhalay wiil.
29-Magiciisiina wuxuu u bixiyey Nuux, isagoo leh, Kanu waa inooga raaxayn doonaa shuqulkeenna iyo hawsha gacmaheenna, xagga dhulka Ilaah habaaray.
32-Nuuxna wuxuu jiray shan boqol oo sannadood; wuxuuna dhalay Sheem, iyo Xaam, iyo yaafet.

-Magaca Metushellax wiilkii uu awoowaha u ahaa wuxuu ahaa Nuux.

-Waxaannu Nuux ku baran doonna casharradeenna soo socda.